Federal Republic of Somalia
Ministry of Finance
Office of the Minister

جمهورية الصومال الفيدرالية
وزارة المالية
مكتب الوزير

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Wasaaradda Maaliyadda
Xafiiska Wasiirka

Ref:MOF/OM/ 1390 /23 **September 11, 2023**

Hagaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dowladda

Wasiirka Maaliyadda ee Dawladda Federaalka Soomaaliya

Isagoo Tixraacaya: Qodobka 9(6) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud (Sharci Lr.17) oo dhigaya in Wasiirka Maaliyadda awood u leeyahay in uu soo saaro hagayaal lagu fulinayo qodobadda Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ee 2019;

Markuu Arkay: In Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee 2019 iyo Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dowladda oo ay ansixiyeen Golaha Wasiirada 17/08/2023 ay u baahanyihiin Hage faahfaahsan si loo hubiyo in dhammaan hantida danta guud iyo agabka Dowladda loo ilaaliyo, loo diiwaan geliyo, loo xisaabiyo, loogana soo warbixiyo si hufan;

Isagoo Maanka Ku-haaya: In ay tahay daruuri in dhammaan hantida danta guud iyo agabka Dowladda lagu asteeyo magaca Dowladda, walibana loo soo gacan geliyo Dowladda, si loogu maamulo si waafaqsan nidaamyada maaliyadeed ee Dowladda;

Waxaa uu halkan ku soo saarayaa Hagaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dowladda oo ka kooban qodobada soo socda:

QAYBTA 1-AAD

QODOBADA GUUD

Qodobka 1-aad

Magaca iyo Ujeedada

1. Hagahan waxaa loogu yeerayaa Hagaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dowladda.

2. Ujeedada Hagaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dowladda ayaa ah in lagu horumariyo dhaqangelinta Sharciga Maareynta Maaliyadda Dawladda, 2019 iyo Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dawladda ee 2023, si loo hubiyo in dhammaan hantida danta guud iyo agabka Dowladda loo ilaaliyo, loo diiwaan geliyo, loo xisaabiyo, loogana soo warbixiyo si hufan.

3. Wasiirka Maaliyaddu ayaa usoo saaray Hagahan Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dowladda ("Hagaha") si waafaqsan Qodobka 9(6) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud iyo Qodobka 3(2)(b) ee Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dawladda, waxana loogu tala galay in lagu maareyo maamulka hantida danta guud iyo agabka Dawlada ee ku qeexan Qodobka 3-aad ee Hagahan iyo in lagu hubiyo ka miro dhalinta hadafyada ku taxan Qodobka 5-aad ee Hagahan.

Qodobka 2-aad

Qeexitaanno/ Erey bixin

1. Ereyadan soo socda wuxuu mid walba yeelanayaa fasiraadda ku hor qoran:

    b) **"Xisaabiyaha Guud":** Waxaa loola jeedaa Xisaabiyaha Guud ee leh xilalka iyo mas'uuliyadaha ku qeexan Qodobka 10-aad ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud.

    t) **"Sarkaal Idman":** Waxa loola jeedaa sarkaal Dawladeed oo loo magacaabay si waafaqsan Qodobka 12(1) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud.

    j) **"Wasiir":** Waxaa loola jeedaa Wasiirka Maaliyadda ee Dowladda Federaalka.

    x) **"Waaxda Hantida Qaranka":** Waxa loola jeedaa waax ka tirsan Wasaaradda oo u xilsaaran maaraynta hantida.

    kh) **"Diiwaanka Hantida Qaranka":** Waxaa loola jeedaa diiwaan dhammeystiran oo lagu diiwangeliyo hantida danta guud iyo agabka Dowladda, oo ka kooban macluumaadka lagama maarmaanka ah ee dhammaan hantida danta guud iyo agabka Dowladda ee ku suntan, oo ay maamulaan Hay'addaha Dowladda Federaalka. Diiwaankaan ayaa ka dhex aasaasan Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), waxaana maamula Waaxda Hantida Qaranka oo taageero ka helaysa Xisaabiyaha Guud.

d) **"Nidaamka Khaaska u ah Hay'addaha ee Maareynta Hantida":** Waxaa loola jeedaa nidaam khaas u ah hay'ad walba oo ka tirsan Dowladda, kaas oo ay diyaarisay isla hay'adda isticmaaleysa, looguna talagalay maareynta hantida danta guud iyo agabka Dowladda ee ku suntan hay'adda.

r) **"Hay'adaha Dawladda ama Hay'ad Dawladeed":** Waxa loola jeedaa hay'ad kasta oo ka tirsan Dawladda Faderaalka ee Soomaaliya oo laga maalgeliyo Miisaaniyadda Qaranka ee lagu qeexay Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud.

s) **"Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud":** Waxaa loola jeeda Sharci Lambar 17 ee soo baxay 25 December 2019, kaas oo loogu talagalay maareynta maaliyadda guud.

sh) **"Guddiga Hantida Danta Guud":** Waxa loola jeedaa Guddiga lagu aasaasay Qodobka 3(1) ee Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dawladda, 2023.

dh) **"Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dawladda":** Waxaa loola jeedaa Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dawladda ee uu ansixiyay Golaha Wasiiradu ee DFS Agoosto 17, 2023.

2. Eray kasta oo halkan lagu adeegsaday ee aan lagu qeexin Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ama Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dawladda balse lagu qeexay Hagahan waxa uu yeelanayaa macnaha lagu siiyay Hagahan.

3. Eray kasta oo halkan lagu adeegsaday ee aan lagu qeexin Hagahan, balse lagu qeexay Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud ama Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dawladda, waxa uu yeelanayaa macnaha lagu siiyay Sharcigaas ama Xeer-nidaamiyahas.

Qodobka 3-aad

Qeexitaanka Hanti Dan Guud iyo Agab Dawlad

1. Iyadoo lagu salaynayo qeexitaanka ku qoran Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, "“Hantida Xukuumadda Fedaraalka" waxaa loola jeedaa dhammaan nuucyada kala duwan ee hantida guurtada ah iyo mida maguurtada ah oo ay leeyihiin Hay'adaha Dawladda. Sida ku cad Qodobka 50(2) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, Dawladdu, iyada oo ka wakiil ah Shacabka, waxay awooddeeda ku lahaaneysaa, kuna maamuleysaa hantida soo socota:

b) xeebaha badaha, dekedaha, gacan-biyoodyada yaryar, marsada, kaabiga, kannaalka badda, biyaha qooriga oo ku furan badda;

t) harooyinka dabiiciga ah, Wabiyada iyo dooxyada oo ay ku jiraan kuwa dhulka hoostiisa mara;

j) kheyraadka macdanta;

x) xerooyinka ciidamada iyo kaydka hubka;

kh) qalcadaha, dekedaha iyo garoomada diyaaradaha ciidamada iyo goobaha loo dhisay difaaca Qaranka; iyo

d) hantida ma guurtada ah iyo shay kasta oo Dawladda Federaalku u aqoonsato in uu yahay shay taariikhi ah, ama raad taariikheed ah (aasaar), ama farshaxanka qadiimiga ah ee Qaranka qiimo u leh.

2. Ka sokow hantida dabiiciga ah, mida diffaca iyo tan taariikhiga ah ee kor ku xusan, hantida hoos ku xusan waxa iska leh Dawladda, hadii aan cid kale u haysan mulkiyad sharci ah:

b) kiliyada iyo goobaha gacan-ku-sameyska ah ee biyaha;

t) ilaha biyaha dabiiciga ah, ceelasha, meelaha wax lagu warraabiyo, togagga iyo tubooyinka biyaha tuura;

j) wadooyinka, dariiqyada, fagaareyaasha bulshada, laamiyada waa weyn ee xawaaraha lagu maro, gegida-diyaaradaha madaniga ah, isgaarsiinta iyo rakibaadda aaladaha bilaa-xarkaha ah, telefoonka iyo rakibaadda radio teleefoonada, dariqyada iyo waddooyinka lagu safro ee caamka ah, meelaha safarka iyo xooluhuba joogsadaan, qabuuraha iyo suuqyada; iyo.

x) hantida maguurtada ah, walxaha taariikhiga ah, ama aasaar ah, iyo kuwa leh qiimo farshaxan, marka laga reebo kuwa ku xusan farqada 1(d) ee Qodobkaan.

3. Iyadoo lagu salaynaayo dabeecadooda iyo shaqada ay u hayaan danta guud iyo Dalkaba, hantida danta guud ee kor lagu tixay waxa loo tixgelinaya hanti dan guud oo loo qoondeeyay danta guud.

4. Marka laga soo tago hantida danta guud ee ku xusan faqrada 1-aad iyo 2-aad ee Qodobkaan, si waafaqsan Qodobka 51-aad ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud, hantida soo socota, waxaa iyana iska leh Dawladda:

b) hanti ma guurto ah oo cid lihi jirin;

t) dhismayaasha Dawladda iyo hantida dhextaala oo ay leedahay Dowladdu una isticmaasho fulinta adeegyada, iyo

j) hanti kasta ama lahaanshaheeda ay Dawladdu ku yeelatay sida sharcigu qabo, dhaxashay ama la wareegtay, hadiyo ahaan loo siiyey, iib ama wareejin.

5. Iyadoo aan waxba u dhimayn qeexitaannada hantida danta guud ee kor ku xusan, "Agabka Dowladda", waxaa loola jeeda, sida ku cad Qodobka 2(1)(t) ee Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dawladda, hantida guurtada ah oo ay Dawladdu leedahay oo ay ku jiraan, balse aan ku koobneyn, dhammaan mishiinnada nuucyadooda kala duwan, gaadiidka, qalabka elegtarooniga ah, mishiinnada iyo qalabka warshaddaha, alaabta xafiiskayada, xoolaha nool, saadka, hantida dhextaala dhismayaasha Dawladda oo ay leedahay Dowladdu una isticmaasho fulinta adeegyada iyo hanti kasta oo kale oo guurta ah ee uu Wasiirku ku qeexo wareegto.

Btm

Qodobka 4-aad

Kala soocidda hantida iyo agabka Dowladda

1. Hantida waxaa loo kala saaraya sida soo socota:

   b) mid la soo saaray ama aan la soo saarin iyadoo lagu salaynayo in hantidu tahay mid dabiici ah ama mid gacan ku sameeysa;

   t) mid hadda shaqaynaysa ama aan hadda shaqaynayn, iyadoo ay ku xirantahay isticmaalkeeda halkii sano ee ugu danbeeyay;

   j) mid la taaban karo ama aan la taaban karin, iyadoo lagu salaynayo in ay leedahay jir la taaban karo iyo in kale; ama

   x) iyadoo lagu salaynaayo nooca ay tahay, sida dhul, dhisme iyo qalab; ama mid maaliyadeed iyo mid aan ahayn, iyadoo ay ku xirantahay in ay tahay lacag caddaanka ah oo diyaar u ah isticmaal.

2. Guud ahaan, Hagahan wuxuu u kala saarayaa hantida mid maaliyadeed iyo mid aan ahayn, iyadoo maanku lagu haayo in Heerarka Caalamiga ah ee Nidaamka Xisaabinta Hay'adaha Dowladda (IPSAS) ay u qeexeen hanti maaliyadeed kuwa soo socda:

   b) lacag caddaan ah;

   t) xuquuq ku qoran qandaraas oo caddeynaysa in cid xaq u leedahay inay cid kale ka hesho lacag caddan ah ama hanti kale oo maaliyadeed;

   j) xuquuq ku qoran qandaraas oo caddeynaysa in cid xaq u leedahay in cid kale ugu sarifto dukuminti maaliyadeed si faa'ido lah; ama

   x) dukuminti maaliyadeed ee hay'ad kale leedahay.

3. Hantida aan maaliyad ahayn waxaa loola jeeda shay leh qiime lagu go'aamiyay sifooyin jireed ee la taaban karo sida bakhaarada, qalabka, dhulka, dhismayaasha, xoolaha, alaabada, kaydka, khayraadka dabiiciga ah iyo xuquuqda garaadka. Hantida aan maaliyadda ahayn waxaa ka mid ah:

   b) Hantida la taaban karo sida dhulka, dhismayaasha, kaabayaasha dhaqaalaha, dhirta iyo qalabka, gaadiidka, hantida noolaha iyo mida hidaha iyo dhaqanka;

   t) hantida aan la taaban karin, oo ay ku jiraan nidaamyada software tignoolajiyada (software systems) iyo hantida garaadka; iyo

   j) alaabada iyo kaydadka kale (other stocks).

4. Iyadoo maanka lagu hayo kala soocidda hantida ee kor ku xusan, Hagahani waxaa loogu talagalay in lagu maareeyo maamulka hantida Dawladda Faderaalka, ha ahaato hanti maaliyadeed iyo mid aan maaliyad ahaynba, oo ay leeyihiin Hay'adaha Dawladda Federaalka, balse waxaa shardi ah in hantida aan maaliyadda ahayn ay noqon karto guurto ama ma guurto, mid la taaban karo ama aan la taaban karin, oo ay ku jiraan agabka.

5. Iyada oo la raacayo nidaamyada lagu sheegay Hagahan ee kala soocida iyo qiimaynta, Hagahan waxa sidoo kale ujeedadiisu tahay in lagu maareeyo oo lagu xakameeyo hantida danta guud iyo agabka Dawladda oo qiimahoodu yahay ama ka badan yahay (acquisition value and depreciated/impaired value) saddex boqol ($300) oo Doollarka Maraykanka ah, kuwaa oo leh waxtar iyo cimri dhaqaale oo ka badan hal sano.

Qodobka 5-aad

Hadafka Hagaha

1. Hagahan waxa loo soo saaray si waafaqsan Qodobka 9(6) ee Sharciga Maaraynta Maaliyadda Guud iyo Qodobka 3(2)(b) ee Xeer-nidaamiyaha Maareynta Hantida Danta Guud iyo Agabka Dawladda, si loo hubiyo in dhammaan hantida danta guud iyo agabka Dowladda loo ilaaliyo, loo diiwaan geliyo, loo xisaabiyo, loogana soo warbixiyo si hufan. Sidaa darteed, hadafyada Hagahan ayaa ah in la hubiyo in:

    b) dhammaan hantida danta guud iyo agabka Dowladda la asteeyo, loo soo gacan geliyo Dowladda, lagu maamulo, laguna sunto magaca Dowladda Federalka Soomaaliya, iyadoo masuuliyada maamulkeeda la hoos gaynayo hay'ad Dowladeed;

    t) habka loo fuliyay soo iibsiga ama helitaanka hanti ama agab kasta oo Dawladeed, ficil kasta ee la xiriira ka saarista agab gacanta Dowladda, arrin kasta ee kale ee saameeynaysa hanti iyo agab Dowladeed oo ay ka mid tahay qaybinta iyo ka tirtirada Diiwaanka Hantida Qaranka, ay yihiin kuwo ay ansixiyeen hay'adaha ku shaqada leh, lagana haayo dukumentiyo iyo diiwaanno la heli karo, oo sahli kara raadraac hanti-dhawris.

    j) ay jiraan habraacyo dhammaystiran oo waafaqsan mabda'a xisaabaadka ee loo dejiyay iyo nidaamyada hantidhawrista, oo si joogta ah loogu adeegsado hubinta iyo qiimaynta hantida iyo agabka;

    x) hantida ama agabku udhigmo qiimahiisa lacageed (dhaqaale ahaan, waxtar ahaan, waqtiga lagu keenay, sida ay deegan ula falgalee) iyo kala qaybinta waajibaadka saraakiisha ku shaqada leh, si looga hortago danaha is diidan, inta lagu guda jiro maareynta hantida ama agabka.

    kh) uu jiro nidaam loogu talagalay maareynta khatarta.

2. Hagahan waxa sidoo kale loo soo saaray si loo xaqiijiyo in:

    b) kor loo qaado isla xisaabtanka, aqoonta, waxqabadka iyo kobcinta tayada saraakiisha dawladda, shaqaalaha, wasaaradaha, waaxaha iyo wakaaladaha ee la xiriirta maaraynta hantida danta guud iyo agabka Dowladda;

    t) la hubiyo in dhammaan hantida guud si hufan oo waxtarleh loo soo iibsho, loo xakameeyo, looga faa'iidaysto, loo ilaaliyo, walibana loo maareeyo si looga sal gaaro danta guud; iyo

    j) la dejiyo hab-dhaqanka asaasiga ah ee la xiriira maamul hantida danta guud iyo agabka Dowladda.

BHG

QAYBTA 2AAD

Mabaadi'da AASAASIGA AH

Qodobka 6-aad

Mabaadi'da Maareynta Hantida danta Guud iyo Agabka Dowladda

1. Mabda 'ahaan, dhammaan hantida iyo agabka ay hora u laheyd ama ay hadda leedahay, isticmaasho, ama ay maamulaan Hay'adaha Dawladda waxaa loo tixgalinaya Hantida Dawladda Federaalka oo ay maasuul ka yihiin Hay'adda Dawladda ee maamulkooda haaya. Hay'adda Dawladda ee masuulka ka ah waxa waajib ku ah ururinta hanti kasta ee Dawladda Federaalka ee iyada lagu suntay, ama ay masuul uga tahay si taarikhi ah ama dabeecad ahaan. Khilaaf kasta ee ku aadan mas'uuliyadda hay'adda Dawladda ee hantida danta guud iyo agabka Dowladda waxa xallinaaya, oo go'aan kama dambays ah ka gaaraya Guddiga Hantida Danta Guud ee lagu aasaasay Qodobka 3(1) ee Xeer-nidaamiyaha.

2. Marka ay maamulayan Hantida Dawladda Federaalka, Hay'adaha Dawladdu waa inay si adag ugu hoggansaman afarta mabda'a ee hoos ku xusan:

   b) hantida danta guud iyo agabka Dowladda waa in loo soo iibiya, loo isticmaala, loona maamula si looga sal gaaro danta guud, oo ay ka mid tahay ujeedooyinka guud ee Dowladda Federaalka iyo u adeegista shacabka;

   t) maareynta hantida danta guud iyo agabka Dowladda waa in ay la jaan qaada, kana mid noqota qorshayaasha istaraatiijiyadeed, shaqooyinka, habraacyada, hawlaha iyo xogaha hay'addaha Dowladda;

   j) go'aamada maamulka hantida danta guud iyo agabka Dowladda waa in ay tixgeliyaan isku dheelitirka kharashka, khataraha iyo waxqabadka hantida, iyadoo maanka lagu haayo cimriga hantida ama agabka, si go'aan looga gaaro in hantida ama agabku u qalmo qiimaha laga soo baxshay;

   x) nidaam wax ku ool ah oo lagu xakameyo, walibana ku dheehan isla xisaabtanka waa in loo sameeyaa maareynta hantida danta guud iyo agabka Dowladda, iyada oo dhammaan hawlaha maareynta hantida iyo agabka Dowladda loo soomeeyo si waafaqsan nidaamkaas.

Qodobka 7-aad

Nidaamka Khaaska u ah Hay'addaha ee Maareynta Hantida

1. Iyadoo la tashanaya Waaxda Hantida Qaranka iyo Xafiiska Xisaabiyaha Guud, hay'ad kasta oo Dawladda katirsan waa inay ku diyaarsata, muddo saddex bilood gudahood ah oo ka bilaabmaysa taariikhda la soo saaro Hagahan, Nidaamka Khaas u ah Hay'adda ee Maareynta Hantida (a fit-for-purpose public property management system), si looga mira dhaliyo ujeedooyinka hantida iyo agabka hay'adda hadda gacanta ugu jira iyo kuwa ay qorsheynayso.

Bthy

2. Nidaamka Khaaska u ah Hay'addaha ee Maareynta Hantida waa inuu ka jawaaba arrimaha soo socda:

   b) baahiyaha inta ku tiirsan hay'adda, oo ay ku mid tahay baahiyaha hay'adda Dawladda laftigeeda;

   t) baahiyaha maaliyadeed, farsamo, sharci, nidaam iyo qaab dhismeed ee hay'adda Dawladda; iyo

   j) shaqooyinka hantida danta guud iyo agabka uu qabto iyo wax ku oolnimada waxqabadkooda;

   x) khataraha maaliyadeed iyo kuwa aan ahayn;

   kh) habka baahinta, ku tababarida shaqaalaha, fulinta, hubinta dhaqan gelintiisa, dib u eegista, iyo wax-kabedellida nidaamka laftigisa;

   d) mabaadi'da maamulka hantida danta guud iyo agabka Dowladda ee lagu sheegay Qodobka 6 ee Hagahan, oo ay ka midyihiin isku dheelitirka kharashka ku baxaya, khatarta ay wajahayan iyo waxqabadkooda.

3. Ugu yaraan, Nidaamka Khaaska u ah Hay'addaha ee Maareynta Hantida ee laga rabo ha'add walba ee Dowladda katirsan in ay diyaarsato waa inuu ka koobnaada qodobbo ka hadlaya arrimaha soo socda:

   b) qorshaynta cimriga iyo hawlgelinta hantida danta guud iyo agabka;

   t) waafajinta Nidaamka Khaaska u ah Hay'addaha ee Maareynta Hantida qorshayaasha istaraatiijiyadeed ee hay'adda, shaqooyinkeeda, habraacyadeeda, hawlaheeda iyo xogaheeda;

   j) dayactirka iyo kasoo warbixinta waxqabadka hantida danta guud iyo agabka;

   x) nidaamka maareynta khataraha; iyo

   kh) nidaamka hantidhawrista iyo xakamaynta ee ka dhisan gudaha hay'adda.

Qodobka 8-aad

U-hogaansanaanta shuruudaha aasaasiga ah

1. Marka ugu horeeysay oo ay diyaariso, ama sadax bilood gudahood sida ku xusan Qodobka 7(1) ee Hagahan, hay'ad kasta oo Dawladeed waa in ay la wadaagtaa Waaxda Hantida Qaranka iyo Xafiiska Xisaabiyaha Guud, Nidaamka Khaaska u ah Hay'addaha ee Maareynta Hantida oo ay diyaarsatay, soo loo hubiyo inuu waafaqsan shuruudaha looga baahanyahay.

2. Marka ay ka helaan Nidaamka Khaaska u ah Hay'addaha ee Maareynta Hantida hay'ad Dawladeed, waa in Waaxda Hantida Qaranka oo kaalma ka heleysa Xafiiska Xisaabiyaha Guu, ay dib u eegis ku sameeysa, walibana hubisaa in Nidaamka Khaaska u ah Hay'adda ee Maareynta Hantida uu:

Bthy

b) inuu ku dhisanyahay mabaadi'da lagu maamulayo hantida danta guud iyo agabka Dowladda ee ku qeexan Qodobka 6-aad ee Hagahan;

t) inuu waafaqsanyahay Hagahan, Xeer-nidaamiyaha iyo Sharciga.

j) muujinaayo sida ay uga go'an tahay hay'adda Dawladda inay si wax ku ool ah u maamusho hantida danta guud iyo agabka Dowladda;

x) ku habboon yahay waajibaadka iyo qaab-dhismeedka hay'adda Dawladda;

kh) muujinaayo ballan qaad ku aadan in nidaamka si joogta ah loo horumarinaayo;

d) ansixiyay Sarkaalka Idman ee hay'adda Dowladda.

3. Haddii aan loo hoggaansamin, marka la maamulaayo hantida danta guud iyo agabka Dowladda, Qodobada Sharciga, Xeer-nidaamiyaha, Hagahaan ama Nidaamka Khaaska u ah Hay'adda ee Maareynta Hantida, hay'adda masuulka ka ah waxaa laga qaadaya tallaabooyinka soo socda:

b) inay soo caddayaan, kana keena warbixino dheeraad ah ficiladda ka leexsan nidaamyada kore ee lagu maamulay hantida iyo agabka;

t) in baaris gaar ah ee hanti-dhawris uu ku sameeyo Hanti-dhawraha Guud ama in Waaxda Hantida Qaranku ku sameeyso baaris qaas ah oo waafaqsan Qodobka 3(6) ee Xeer-nidaamiyaha;

j) in Wasiirku, kadib markuu helo warbixinta baarista ee Waaxda Hantida Qaranka, joojiyo codsiyada kharashaad bixinta (suspension of expenditure warrants) ama u qoondaynta wax miisaaniyada hay'adda Dawladda ee masuulka ka ah u hoggaansanaan la'aanta.

x) in Wasiirku, kadib markuu helo warbixinta baarista ee Waaxda Hantida Qaranka, ku wareejiyo hantida danta guud iyo agabka ay gacanta ku hayso hay'ad kale ee Dawladeed;

kh) in Wasiirku, kadib markuu helo warbixinta baarista ee Waaxda Hantida Qaranka, uu bilaabo tallaboyin dib loogu soo celinayo gacanta Dowladda wixii agab ah ee lumay ama hanti ah oo ka baxday, kuwaa oo koobnaan kara kajarista mushaharka iyo gunnooyin saraakisha masuulka ka ahayd iyo laga joojiyo hay'adda isticmaalka miisaaniyad kasta oo horay loogu qoondeeyay. Waxaa sidoo kale la bilaabi kara, iyadoo lakashana hay'addaha ku haboon, habraacyada kale ee garsoor ee haboon.

4. Haddii Waaxda Hantida Qaranku iyadoo ku guda jirta kormeerkeeda waafaqsan Qodobka 3(6) ee Xeer-nidaamiyaha, ay xaqiijiso inuu dhacay fal dambiyeed ka dhan ah hantida danta guud ama agab Dowladeed, waa in ay si degdeg ah oo aan daahis lahayn, kadib marka ay wargeliso Wasiirka, u gudbisaa Xeer Ilaaliyaha Guud warbixinta kormeerkeeda baariseed.

QAYBTA 3-AAD

TILMAAMAHA GAAR AH EE MAAMULKA HANTIDA IYO AGABKA

Qodobka 9-aad

Tilmaamaha gaarka ah

1. Ka hor inta aan la bilaabin tallaabo kasta oo ku saabsan hanti dan guud ama agab Dowladeed, hay'ad kasta oo Dawladeed waa in ay:

    b) maanka ku haysaa cimriga guud ee hantidu ama agabku uu waxtarka leeyahay;

    t) ka leedahay qorshaynta istiraatijiyadeed hantida iyo agabka; iyo

    j) fahansantahay isla xisaabtanka iyo hufnaanta looga baahanyahay maareynta hantida iyo agabka.

Qodobka 10-aad

Tixgelinta cimriga hantida ama agabku uu waxtarka leeyahay

1. Tixgelinta cimriga hantida ama agabku uu waxtarka leeyahay waxaa loola jeeda qorshayaasha iyo nidaamyada lagu maareynayo hantida danta guud ama agabka Dowladda inta cimrigiisu jiro. Qorshayaashan iyo nidaamyadan waxaa kamida:

    b) diyaarinta iyo dhaqangelinta Nidaamka Khaaska u ah Hay'addaha ee Maareynta Hantida kaas oo dejinaya dhammaan hawlaha ku aadan nidaamka loo maareeynaayo inta lagu guda jiro cimriga hantida ama agabku waxtarka leeayahy. Nidaamka noocan ah ayaa loo baahanyahay si loo hubiyo in hantida danta guud iyo agabka ku jira gacanta hay'adda iyo midka la qorshaynaa mustaqbalka ay gacan ka gaysan karaan wajibaadka hay'adda iyo adeegyada ay bixiso iyo guud ahaan danaha Dowladda Federaalka;

    t) ku soo rogid nidaamo lagu kontaroolo, hawlaha iyo habraacyada loo baahan yahay si loo hirgeliyo nidaamka khaaska u ah hay'adda;

    j) dejinta diiwaan ku haboon hay'adda oo ujeedkiisu yahay in lagu diiwaangeliyo dhammaan hantida iyo agabka hay'adda Dowladda gacanta ku hayso. Diiwaankaan waa inuu ka koobnada xogtii ugu danbeysay oo dhamaystiran ee hantida iyo agabka hay'adda.

2. Nidaamka Khaaska u ah Hay'addaha ee Maareynta Hantida ee la sameeyay si waafaqsan farqada 1(a) ee Qodobkan waa in ugu yaraan ay kujiraan, qorshaha ka faa'iidaysiga hantida danta guud iyo agabka, kaas oo laga rabo inuu muujiyo shuruuda aasaasiga ah ee ah in hantida iyo agabka hadda kujira gacanta hay'adda iyo midka la qorshayna in lasoo iibiyo ay ka jawaaban baahida iyo waajibaadka hay'adda Dowladda. Nidaamku waa inuu sidoo kale muujiya qaab loo cabiraayo waxqabadka iyo ka faai'daysiga hantida iyo agabka, awoodiisa adeeg bixineed, shaqadiisa, wax ko oolnimadiisa, xaalada uu ku suganyahay, iyo kharashka galay iyo midkuu u baahanyahay.

Bthy

Qodobka 11-aad

Qorshaynta istaraatiijiyadeed ee maamulka hantida danta guud iyo agabka Dowladda

1. Hay'add Dawladeed ee kasta waa in ay u diyaarisaa Nidaamka Khaaska u ah Hay'adda ee Maareynta Hantida hab-istaraatiji ah oo waafaqsan dhammaan qorshaha horumarinta ee hay'adda Dawladda iyo Dawladda Federaalka, haykalka maaliyadeed ee muddada dhexe iyo ujeedooyinka maaliyadeed ee hay'adda Dowladdeed.

2. Si loo gaaro yoolka kama dambaysta ah ee laga leeyahay hantida danta guud iyo agabka, hay'adda Dawladdu waa in ay qeexdaa ujeeddada laga leeyahay hantida iyo agabka, kuwaa oo ah ujeedooyin gaar ah, la cabbiri karo, la gaari karo, waaqici ah oo waqti xaddidan leh. Sidaa darteed, nidaamkan waa inuu qeexo:

   b) badqabka hantida iyo agabka iyo sida ay ugu hoggansamayan nidaamyada deegaanka lagu ilaaliyo, kuwa maaliyadda iyo kuwa shuruucda;

   t) waxqabadka wax ku oolka ah ee laga filaayo hantida iyo agabka, si looga sal gaaro hadafka leeyahay iyo adeegyada larabo in bulshada loogu qabto;

   j) lafaha maalgashigii galay ee laga filaayo in hantida ama agabku soo celin karo; iyo

   x) khataraha hantida ama agabku wajihi karo iyo qaababka lagu yareynt karo;

3. Nidaamka Khaaska u ah Hay'adda ee Maareynta Hantida ee Hay'ad kasta oo Dawli ah waa in uu korjoogteeya soo iibsiga, ku shaqaynta iyo dayactirka hantida danta guud iyo agabka, walibana waafaqsanyahay waajibaadka hay'adda Dowladda, adeegyada ay bulshada u hayso iyo Qorshaha Horumarinta Qaranka ee Dawladda Federaalka. Dabaqida Nidaamka Khaaska u ah Hay'adda ee Maareynta Hantida ee Hay'ad kasta oo Dawli ah waa inuu ka bilaawda marka hantida ama agabka lasoo iibiyo, laguna sii dabaqa hawlgelinta iyo dayactirka agabka iyo hantida. Waa in sidoo kale la adeegsada nidaamka markasta oo gacanta Dowladda laga saaray agab ama laga tirtiraayo agab laga saaray gacanta Dowladda Diiwaanka Hantida Qaranka.

Qodobka 12-aad

Isla Xisaabtanka iyo hufnaanta looga baahanyahay maamulka hantida danta guud iyo agabka Dowladda

1. Sarkaalka Idman ee Hay'ad kasta oo Dawladeed ayaa ugu dambayntii masuul ka ah maaraynta hantida danta guud iyo agabka Dowladda ee Hay'adda Dawladda.
2. Si loo xaqiijiyo isla xisaabtanka iyo daah-furnaanta maamulka hantida danta guud iyo agabka Dowladda, Sarkaalka Idman ee hay'ad kasta oo Dawladeed, waa in Nidaamka Khaaska u ah Hay'adda ee Maareynta Hantida ee Hay'adda:

b) ku dhex wakiisha saraakiil si gaar ah mas'uul uga noqonaysa qorsheynta, hawlgelinta, dayactirka, xakamaynta iyo ka warbixinta hantida danta guud iyo agabka Dowladda;

t) waafajiya Nidaamka Khaaska u ah Hay'adda ee Maareynta Hantida waxyaabaha kale ee udegsan hay'adda oo ay ku jiraan miisaaniyada, iyo qorshaha sanadlaha ah ee iibka;

j) ku dhex sameeya habab cad oo qayaxan oo looga soo warbixin karo, sii joogta ah iyo si gaar ahba, sida loo maamulay hantida iyo agabka hay'adda;

x) ku dhex sameeya habab cad oo qayaxan oo loo isticmaali karo marka si qarsoodi ah warbixin loo soo gudbinaayo (whistle-blowing) iyo kuwo kale oo haga baarista, hantidhawrista, kormeerka, xaqiijinta iyo dhaqan-gelinta shuruucda, xeer-nidaamiyasha iyo hagayaasha loogu talagalay maareynta hantida danta guud iyo agabka Dowladda.

QAYBTA 4-AAD

DIIWAANGELINTA HANTI DANTA GUUD IYO AGABKA DOWLADDA

Qodobka 13-aad

Kala-soocidda hantida danta guud iyo agabka Dowladda

1. Hantida danta guud iyo agabka Dowladda waa in loo kala sooca marka la diiwangelinaayo, lana xisaabinaayo si waafaqsan Heerarka Caalamiga ah ee Nidaamka Xisaabinta Hay'adaha Dowladda (IPSAS), oo si gaaban loogu qeexay Lifaaqa 1-aad ee Hagahan.Intaa waxaa dheer, nooc kasta oo hanti danta ama agab ah waa in la diiwaangeliyaa, loo xisaabiya, loona maareeyaa iyadoo maanka lagu haayo cimrigooda ay waxtarka leeyihiin oo lagu sheegay Heerarka Caalamiga ah ee Nidaamka Xisaabinta Hay'adaha Dowladda (IPSAS) oo si gaaban loogu qeexay Lifaaqa 2-aad ee Hagahan. Sidoo kale, Xisaabiyaha Guud waa inuu dejiyaa, isagoo ka qaybgelinaaya Waaxda Hantida Qaranka, Jaantusyada Xisaabaadka (codes on the ChartsofAccounts) oo lagu kala soocaay hantida danta guud iyo agabka Dowladda marka la diiwangelinaayo, la xisaabinaayo ama laga soo warbixinaayo.
2. Hantida danta guud iyo agabka Dowladda waa in si joogto ah loo qiimeeyaa, loona xaqiijiyaa, si dib u kala soocis (reclassification) loogu sameeyo ama looga tirtiro Diiwaanka Hantida Qaranka, si wafaqsan Hagahan.

Qodobka 14-aad

Sumadeynta hantida danta guud iyo agabka Dowladda

1. Dhammaan hantida danta guud iyo agabka Dowladda waa in had iyo jeer loo asteeya inay yihiin kuwa ay leedahay Dawladda Faderaalka, iyadoo cidda sharci ahaan ama ugu danbeyn leh loo aqoonsanaayo isla Dowladda Federaalka. Si loo xaqiijiyo arrinkaan, hanti ama agab kasta oo wadata shahaado lahaansho, sida dhul ama gaadiid,

waa in loo diwaan galiya in ay sharci ahaan u leedahay Dowladda Federaalka, iyadoo hay'ad Dawladeed ee maamulaysa loo aqoonsaanayo, looguna astaynaayo inay tahay cidda hantida iyo agabka masuulka ka ah oo keliya.

2. Si looga sal-gaaro ujeedooyinka laga leeyahay maamulida hantida danta guud iyo agabka Dowladda, hantid ama agab aan wax hay'ad ah aan ku suntaneen waxaa lagu summadayn karaa ama la hoos gayn karaa maamulka hay'ad Dowladeed, iyadoo lagu salaynayo:

    b) sooyaalka ama hab-dhaqanka la xiriira gacan ku haynta iyo maareynta hantida danta guud ama agabka Dowladda ee nuucaan ah;

    t) adeegyada danta guud ee bixintooda ay hay'adda Dawladeed u adeegsanayso hantida ama agabka;

    j) baahiyaha ay hay'adda Dowladeed u qabto hantida danta guud ama agabka Dowladda si ay u gudato doorkeeda iyo waajibaadkeeda shaqo; iyo

    x) doorarka iyo masuuliyadda ay hay'adda Dawladeed iska saari karto ilaalinta iyo maaraynta hantida danta guud ama agabka Dowladda iyada oo lagu salaynayo nooca aytahay hantida danta guud ama agabka Dowladda.

3. Wasiirka isagoo ka duulaya soo jeedinta Waaxda Hantida Qaranka, wada-tashina lasameynaaya Guddiga Hantida Danta Guud, waxa uu awood u leeyahay in uu go'aan ka gaaro hay'adda Dowladda ee lagu suntaayo hanti ama agab aan cidna horay loogu suntin, iyadoo lagu salaynaayo arrimaha lagu tixay faqradda 2-aad ee Qodobkaan. Go'aanada Wasiirka waa in lagu daabaca bogga interneetka ee Wasaaradda Maaliyadda, waana in sidoo kale lala wadaaga hay'adaha Dowladda ee uu Wasiirku u arko inay ku haboon yihiin iyo xubnaha Guddiga Hantida Danta Guud.

4. Haddii ay dhacdo in hay'ad Dawladdeed ay ka cabasho ka qabto go'aanka Wasiirka ee ah in lagu sumadeeyo, lana hoos geeyo hay'ad Dowladda katirsan si loogu maamulo hanti ama agab aan horay suntaneen, hay'adda cabashada qabta waa in ay usoo gudbisataa Guddiga Hantida Danta Guud cabashadeeda muddo 30 maalmood gudahood ah, oo ka bilaabamaysa marka lagaaray go'aanka ah ay ka cabanayso.

5. Si ay ugu maarayso hantida danta guud iyo agabka lagu suntay, oo walibana la hoos keenay maamulkeeda, hay'adda Dowladda waa in ay:

    b) lahaataa Nidaamka Khaas u ah hay'adda ee Maareynta Hantida;

    t) ka diwaangelisa xogta lagama maarmaanka ah ee lagu sheegay Qodobka 4(3) ee Xeer-nidaamiyaha ee ku saabsan hantida ama agabka lagu suntay iyada, Diiwaanka Hantida Qaranka;

    j) waafajisa miisaaniyadeeda iyo qorsheeda iibka, baahida hantida iyo agabka lagu suntay iyada; iyo

    x) si joogto ah uga soo warbixiso xaaladaha ay ku suganyihiin hantida danta guud iyo agabka Dowladda ee lagu suntay iyada.

Qodobka 15-aad

Diiwaangelinta hordhaca ah ee hantida danta guud iyo agabka Dowladda

1. Sida ku cad Qodobka 4(1) ee Xeer-nidaamiyaha, Waaxda Hantida Qaranku waa in ay samayso oo ay ilaalisaa Diiwaanka Hantida Qaranka, oo ah diiwan dhamaystiran oo ay ku jiraan xogta dhammaan hantida danta guud iyo agabka Dowladda ee Dowladda Faderaalka, kaas oo ka dhex furan Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS).

2. Sida ku cad Qodobka 4(2) ee Xeer-nidaamiyaha, dhammaan hay'adaha Dawladda, iyagoo isticmaalaya qaybaha loogu talagalay ee Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), waa inay si hordhac ah uga diwaangeliyaan Diiwaangelinta Hantida Qaranka, dhammaan xogta hantida danta guud iyo agabka Dowladda ee iyaga ayaa gacanta ku hayan.

3. Xogta horudhaca ah ee looga baahan yahay in hay'add kasta ay ku shubto Diiwaanka Hantida Qaranka waa kuwa ku taxan Qodobka 4(3) ee Xeer-nidaamiyaha.

4. Dhammaan hay'adaha Dawladda waa inay kusoo afjaran diiwangelinta xogta hantida danta guud iyo agabka Dowladda muddo saddex bilood gudahood ah oo aan marna ka badan karin hal sano, marka la soo saaro Xeer-nidaamiyaha. Haddii ay dhacdo in hay'add katirsan Dowladda aysan u hoggaansamin faqradaha hore, Waaxda Hantida Qaranku waa inay fulisaa tallaabooyinka ku xusan Qodobka 4(4) ee Xeer-nidaamiyaha.

5. Sida ku cad Qodobka 5(1) ee Xeer-nidaamiyaha, inta lagu guda jiro diiwangelinta horudhaca ah, haddii hanti dan guud ama agab Dowladeed aan lagu suntin wax hay'add Dowladeed ah, hantidaas ama agabkaas waxaa lagu suntayaa Wasaaradda Maaliyadda oo maamulaysa. Ama, Waaxda Hantida Qaranku waxay u soo jeedin kartaa Wasiirka, si waafaqsan Qodobka 5(2) ee Xeer-nidaamiyaha, in hanti ama agab aan lagu suntin wax hay'ad Dowladeed lagu sunto, lana hoos keeno hay'ad katirsan Dowladda, iyadoo lagu salaynaayo shuruudaha ku cad isla Qodobka 5(2) ee Xeer-nidaamiyaha.

6. Ka hor inta aan la bilaabin diwaan-galinta horudhaca ah, waa in Waaxda Hantida Qaranka iyo Xafiiska Xisaabiyaha Guud ay siiyaan tababarada loo baahan yahay hay'adaha Dowlada si ay u gutaan hawlaha looga baahan yahay.

Qodobka 16-aad

Dhamaystirka (updating) xogta hantida danta guud iyo agabka

1. Diiwaangelinta horudhaca ah ka dib, dhammaan hay'adaha Dawladda waa in ay xaqiijiyaan in dhammaan xogta ku saabsan hantida iyo agabka lagu suntay iyaga oo ay si horudhac ah u diiwaangeliyeen, ay tahay mid sax ah, lana dhammaystiro haddii ay daruuri tahay, iyadoo loo hoggaansamaayo Qodobka 4(5) ee Xeer-nidaamiyaha.

2. Sida ku cad Qodobka 4(5) ee Xeer-nidaamiyaha, marka ay dhamaato diiwaangelinta horudhaca ah, hay'addaha Dowladdu waa inay ka diwaangeliyaan Diiwaanka Hantida

Qaranka, dhammaan hanti iyo agab kasta oo cusub ee gacantooda soo gala muddo laba toddobaad gudahood ah marka ay hay'adda Dawladdu la wareegto hantida ama agabka.

3. Iyadoo la raacayo mabaadi'da xisaabaadka ee qiimaynta hantida danta guud iyo agabka ee uu soo saaro Xisaabiyaha Guud, hay'adda Dawladdu waa inay gelisaa Diiwaanka Hantida Qaranka qiimo-dhaca ku yimaada sanad kasta hantida iyo agabka gacanteeda kujira.

Qodobka 17-aad

Kormeerka iyo hubinta hantida danta guud iyo agabka Dowladda

1. Hay'adda Dawladdu waa in ay kormeer lagu hubinaayo xaalada ay ku sugantahay hantida danta guud oo ay masuulka ka tahay (sida dhulalka, dhismayaasha iyo kaabayaasha) samaysaa ugu yaraan 2-dii sanaba mar. Hay'addu waa in sidoo kale ay kormeer la mid ah midka hore ku samaysaa hal bil dhamaadka sanad kasta, agabka Dowladda ee gacanteeda kujira ama markasta oo ay ka codsato Waaxda Hantida Qaranka.

2. Kormeer kasta oo lagu hubinaayo hanti ama agab waa in lagu wargeliyaa Sarkaalka Idman ee hay'adda Dawladda iyo Waaxda Hantida Qaranka iyada oo lagu soo gudbinaayo xogta soo socota qaybta hubinta ee Diiwanka Hantida Qaranka ee ka furan Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS):

   b) aqoonsiga (ID) hantida danta guud ama agabka Dowladda;

   t) taariikhda kormeerka iyo magaca kormeeraha;

   j) macluumaadkii ugu danbeeyay ee xaaladda hantida ama agabku ku suganyahay, gaar ahaan haddii la helo wax cillad ah; iyo

   x) warbixin dhameystiran oo ku saabsan kormeerka;

3. Warbixinta kormeerka ee uu soo gudbiyay kormeeraha waa in ugu yaraan ay ku jirtaa sharaxaad ku saabsan xaaladda ay ku sugantahay hantida ama agabka lasoo kormeeray iyo dayactirka ay u baahantahay. Hanti ama agab kasta oo la kormeeray waa in Diiwaanka Hantida Qaranka ee Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) dhexdiisa lagu muujiya inay tahay mid la kormeeray.

QAYBTA 4-AAD

Qodobka 18-aad

Wadooyinka loo maraayo marka ay hay'ad rabto inay hesho hanti ama agab (Acquisition)

1. Hay'ad kasta ee Dawladeed waa in ay si waafi ah uga dhex hadashaa Nidaamka Khaaska u ah Hay'adda ee Maareynta Hantida qorshaheeda ku aadan wadooyinka ay u marayso marka ay rabto inay hesho hanti ama agab. Qaybaha Nidaamka ee ka hadlaya helista hantida ama agabka waa in ay faahfaahiyaan:

Bth

b) wadooyinka lagu heli karo hanti ama agab oo ay ka midyihiin soo iibsashada, kiraysashada, dhisida, la shuraakoobida shirkadaha gaarka loo leeyahay ama isticmaalida hanti horay u jirtay;

t) dhaqaalaha ku baxayaa wada kasta. Qiimayntaan dhaqaale waa in ay:

i. waafaqsantahay habraaca qiimaynta ee lagu dejiyay qodobada ku haboon ee Sharciga Iibka Qaranka, Xeer-nidaamiyihiisa ama sharci kasta oo kale oo dhaqan-gal ah, haddii wada la doortay ay tahay in maalgashi guud ee raasumaal lasameeyo (acquisition of an asset via a public investment project or capital expenditure);

ii. ka mid tahay qiyaas ku aadan kharashyada lagalaayo kahor intaan hantida ama la helin, kharash-ka ku baxaaya habraaca soo iibsiga, qiimaha hantida ama agabka, kharashka ku kaacaya kahortaga khatarta iyo kharaashaadka hawlgelinta iyo ka shaqaysiinta; iyo

iii. muujisa faai'dada kasoo galaysa hay'adda Dowladda isticmaalka hantida ama agabka.

j) khatarta wada kasta ee hanti ama agab lagu helaayo ay leedahay; iyo

x) wadada lasoo jeediyay ee hantida ama agabka lagu heli karo.

2. Qodobbada Nidaamka Khaaska u ah Hay'addaha ee Maareynta Hantida ee ka hadlaya helitaanka hanti ama agab cusub waa inay la jaan qaadi karaan qorshaha oo ay qaby ka yihiin qorshaha iibka iyo miisaaniyadda hay'adda.Tusaale ahaan, qorshe kasta oo hanti ama agab lagu soo helaayo ee ugu baahan kharash bixin misaaniyadda waa inuu ku xusnaada soo jeedinta miisaaniyadda hay'adda Dowladda ee loo soo gudbiyay Waaxda Miisaaniyadda ee Wasaaradda Maaliyadda. Codsiga hay'adda Dowladda ee ku aadan soo iibsiga hanti ama agab qiimihiisu ka badan yahay $10,000 oo Doolar Mareeykanka ah waa inuu la socdaa warbixin kooban oo muujinaysa qiimaynta wadooyinka hantida ama agabka lagu soo heli karay, qiimayn ku aadan dhaqaalaha ku baxaaya, khataraha iyo wadada lasoo jeediyay in lagu soo helo hantida ama agabk. Marka codsiga soo iibsasha hanti ama agab lagu daro soo jeedinta miisaaniyadda, Waaxda Miisaaniyadda waa in latashata:

b) Waaxda Hantida Qaranka marka ay ku darayso soojeedinta miisaaniyada soo iibsiga hanti ama agab cusub, oo qiimihiisu ka badanyahay $10,000, iyadoo Waaxda Hantida Qaranka, si waafaqsan Qodobka 6(3)(b) ee Xeer-nidaamiyaha ay ka dhiiban karto talloyinka soo socda:

i. Jiritaanka hanti dan guud oo lagu wareejin karo ama la siin karo hay'adda doonaysa hantida.

ii. Sidda ay hay'adda Dowladeed ee codsiga keentay ay ugu hoggaansan tahay shuruucda, xeerarka iyo hagayaasha dhaqan-galka ah ee la xiriira maareynta hantida danta guud iyo agabka Dowladda.

t) Wasiirka, haddii hawsha soo iibsashada hantida ay u baahantahay kharash raasamaal ama ay tahay maalgalinta mashruuc guud.

BtLY

3. Hanti kasta oo ay hay'adda Dowladeed ku hesho sifo deeq, hibayn ama laga maalgeliyey dibadda waa in la waafajiyaa nidaamka lagu soo helay Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud iyo Xeer-nidaamiyaha Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud. Hanti kasta oo ay hay'adda Dowladeed ku hesho sifo deeq, hibayn ama laga maalgeliyey dibadda waa in loo aqoonsadaa in ay tahay hanti dan guud waana in lagu qoraa DiiwaankaHantida Qaranka, iyadoo la xusaayo qiimaha hantidaas ku fadhiso.

4. Si waafaqsan Qodobka 6(6) ee Xeer-nidaamiyaha, marka la ansixiyo foojarka kharashka ku baxaya iibka hantida ama shahaadada dhamaystirka iibka la galiyo Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), waa in Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) si toos ah hantida danta guud ama agabka Dowladda ee cusub uga diiwangeliya Diiwaanka Hantida Qaranka ama uu ku sunta hay'adda Dowladda ee kharashka gashay.

5. Dhammaan habraacyada lagu soo iibsanaayo hanti ama agab cusub waa in ay waafaqsanyihiin:

    b) qodobada ku habboon ee Sharciga Iibka Qaranka iyo Xeer-nidaamiyaashiisa; iyo

    t) qodobada ku habboon ee Sharciga Maareynta Maaliyadda iyo Xeer-nidaamiyaha Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud.

Qodobka 19-aad

Dayactirka hantida iyo agabka

1. Iyadoon waxba loo dhibay Qodobka 7(9) ee Xeer-nidaamiyaha, laba usbuuc gudahood, oo aan marnaba ka badan karin sadax bilood, kadib marka lasoo saaro wareegtada u yeerista soo jeedinta miisaniyadda, hay'adda Dowladda waa in ay diyaarisaa, haddii ay horay ugu diyaarsaneydna, cusbooneysiida, qaybaha ku shaqadaleh dayactirka hantida iyo agabka ee Nidaamka Khaaska u ah Hay'adda ee Maareynta Hantida, kadibna usoo dirtaa Waaxda Hantida Qaranka si dib-u-eegis loogu sameeyo. Marka ay hesho, Waaxda Hantida Qaranka waa ay:

    b) Waaxda Miisaaniyadda kala tashanaysaa qorshaha dayactirka gaar ahaan arrinta qorshaha dayactirka raasamaalka; iyo

    t) dib u eegis ku sameeynaysaa qorshaha dayactirka si ay talooyinka ku haboon uga dhiibato. Hay'adda Dowladda ee hantida masuulka ka ah waa inay tixgelisaa tallooyinka lasiiyay marka la diyaarinayo, lana fulinayo Miisaaniyadda.

2. Hay'adda Dowladda waa in ay fulisaa dayactirka ay u baahantahay hantida iyo agabka lagu suntay, oo ay masuulka ka tahay, kuna ilaalisaa inay kujiraan xaalad wanaagsan, si loo hubiyo in la kordhiyo cimriga ay waxtarka leeyihiin, korna loo qaadi wax-qabadkooda. Si waafaqsan Qodobka 7(8) ee Xeer-nidaamiyaha, dayactirka buuxiya mid ka mid ah shuruudaha soo socda waa in loo aqoonsada dayactir raasamaal:

b) marka hantida danta guud lagu sameeyo dayactir iyo dib-u-habayn ka dhigaysahantidaas sidii mid cusub;

t) marka lagu daro ama laga bedello qayb muhiim ah hantida danta guud;

j) marka hantida danta guud loo yeelo isticmaal cusub;

x) marka la balaariyo awoodda hantida danta guud;

kh) marka la balaariyo awooda qaab dhismeedka ee hantida danta guud; iyo

d) marka la kordhiyo cimrigeeda waxtarka leh ee hantida danta guud.

3. Si waafaqsan Qodobka 7(7) ee Xeer-nidaamiyaha, kharashaadka dayactirka joogtada ah waa in lagu daraa kharashka loo isticmaalayoagabkaiyo adeegyada halka kharashka dayactirka raasamaalka lagu darayo kharashaadka raasamaalka oo loo badalayo laguna daro qiimaha hantida qaranka ee dib loo cusboonaysiiyey ee ku jirta Diiwaanka Hantida Qaranka. Hay'adda Dowladda waa in gelisaa aqoonsiga hantida ama agabka iyo warbixin ku saabsan dayactirka lasameeyay Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), marka lasoo dalacanaayo kharashbixin laxariirta dayactirka lagu sameeyay hantidan ama agabkaan.Diiwanka Hantida Qaranka ee ka furan Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) waa inuu muujiya kharashka ku kacay dayactirka lagu sameeyay hanti iyo agabkasta ee Dowladeed. Diiwangelinta dayactirka lasameeyay kasakoow, waa in Waaxda Hantida Qaranka waa inay kormeer xaqiijin ah ku sameeysaa dayactirka lasameeyay, si joogta ahna u korjoogtaysa fulinta qorshaha dayactirka hantida iyo agabka ee hay'addaha Dowladda.

Qodobka 20-aad

Isticmaalka hantida iyo dakhliga kasoo xarooda

1. Wasiirka waa inuu kusoo saaro wareegto qiimaha kirada ee lagu dabaqaayo hantida danta guud ee la kiraynaayo, iyadoo kirada kasoo xaroota hantidan looso uruurinaayo nidaam waafaqsan midka lagu qeexay Qodobka 4(2) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ama Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee dhaqan-galka ah markaas.

2. Iyadoo loo hoggaansamaayo Qodobka 8(2) ee Xeer-nidaamiyaha iyo Qodobka 30(4) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ee ka hadlaa balan-qaadyada soconaya wax ka badan hal sannad maaliyadeed, hay'add Dowladdeed waxa ay kirayn-kartaa hantida danta guud oo ay iyadu maamusho, haddii heshiis kirada uu soconaayo hal sano kabadan, kadib marka ay oggolaansho kahesho Wasiirka Maaliyadda.Heshiis kasta oo lagu kiraynaayo hanti dan guud waa in Dowladdu ka heshaa lacag kiro ah, oo loo aqoonsanaayo dakhli nuuciisu aan ahayn canshuur, kaas oo loo uruurinaayo nidaam waafaqsan midka lagu qeexay Qodobka 4(2) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud ama Xeer-nidaamiyaha Maareynta Maaliyadda Guud ee dhaqan-galka ah markaas.

3. Iyadoo la raacayo mab'da saldhiga u ah awoodda Wasiirka laguu siiyay Qodobka 5(1) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, Wasiirku waxa uu dhaafi kara lacagta kirada ah ee laga rabo hanti dan guud oo la kireeyay, marka:

b) cida hantida danta guud laga kireeyay ay tahay hay'add kale oo katirsan Dowladda Federaalka, ama mid katirsan Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ama Dowladaha hoose;

t) cida hantida danta guud laga kireeyay ay tahay mashruuc laga maalgeliyo dibada, oo taageero lacageed ka helo deeq bixiye-yaal, deeqdaas oo lagu daray miisaaniyadda Qaranka;

j) cida hantida danta guud laga kireeyay ay tahay kuwo hooy iyo meel ay seexdaan siiya dad aan hooy laheen;

x) cida hantida danta guud laga kireeyay ay u isticmaalayso hantida si'ay ula tacaasho masiibooyinka dabiiciga ah, cudurada faafa ama xaaladaha kale ee degdegta ah; iyo

kh) cida hantida danta guud laga kireeyay ay u isticmaalayso hantida si'ay u bixiso adeegyada iyo barnaamijyada aas-aasaiga ah ee loogu talagalay soo kabshada bulsha.

4. Ugu yaraan, heshiiska kirada hantida danta guud waa in:

b) uu qeexa ujeedooyinka loo isticmaalyo hantida la kireeyay;

t) shuruud ka dhigaa in qiimaha kirada dib-u-eegis iyo cusbooneysiin lagu sameeynaayo marka uu dhamaado heshiiska, haddii la cusboonaysiinaayo heshiiska. Haddii mudada heshiiska kirada ay ka badantahay 5 sano, waa in qiimaha kirada ee heshiiska ku qoran dib-u-eegis iyo cusbooneysiin lagu sameeyo marka ay dhammaato 5 sano;

j) oggoladaa in hay'adda Dowladda ee hantida kiraysan masuulka ah ee lagu suntay, Waaxda Hantida Qaranka, Xisaabiyaha Guud iyo Hantidhawrka Guud in ay so galaan hantida xilli kasta oo ay u baahdaan;

x) ay ku jirtaa qodob oggolanaaya joojinta heshiiska haddii cidda hantida laga kireeyay aysan u hoggaansamin qodobada heshiiska, iyadoo Wasiirka ama hay'adda hantida masuulka ka ah ay ka bixi karto heshiiska, kadib talo bixinta Waaxda Hantida Qaranka;

kh) lagu soo xareeyaa Diiwanka Hantida Qaranka ee ka furan Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), kadibna nuqul daabacan la keena Waaxda Hantida Qaranka; iyo

d) laga diiwaangeliyaa Hantidhawrka Guud.

5. Qodobka 108-aad ee Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada waxa uu sheegaya in " Heshiis-dheefwadaag macnehiisu yaha in Dowladda ama hay'adaheeda ay ku wareejiso muddo cayiman hanti-dadweyne hay'ad gaar loo leeyahay si ay uga hawlgasho, u maamusho, u manaafacsato ama u horumariso hantida iyadoo ka bixinaysa khidmo shardiguna yahay in Dowladda danteeda guud ee hantida ku

BHY

waayeen hantidaasna ugu soo noqoneyso hay'adaha Dowladda muddo cayiman". Sidaa darteed, haddii hay'adda Dowladda katirsan ay go'aansato in hanti dan guud ee iyada ku suntan ay ku wareejiso hay'ad gaar loo leeyahay iyadoo la isticmaalaayo heshiis dheef-wadaaga, waa in heshiiskaan loo gala iyadoo loo hoggaansamaayo habraacyada ku qoran Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada iyo Xeer-nidaamiyaashiisa ama Sharcigii kale oo markaas badala.

6. Nuucyada kala duwan ee dakhliga kasoo xarooda hantida danta guud ee kiraysan ama cid kale lagu wareejiyay, waa in:

   b) lagu daraa odoroska dakhliga ee miisaaniyadda iyo maareynta lacagaha caddaanka ah;

   t) ay soo uruuriso Waaxda Dakhliga ee Wasaaradda Maalidaa iyadoo isticmaalaysa nidaamyada sharcigu dejiyay ee dakhli uruurinta;

   j) muujiya Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) in dakhligaas kasoo xarooday hanti dan guud ee cayiman;

Qodobka 21-aad

Shuruudaha heshiisyada kirada hantida danta guud

1. Muddad heshiiska kirada hantida danta guud waa in uusan ka badan 5 sano oo ka bilaabmaysa maalinta uu dhaqan-galo heshiiska kirada, balse Wasiir Maaliyadda, isagoo tixgelinaaya daruufo gaar ah oo si qoraal ah loogu soo gudbiyo, waxa uu oggolaan karaa in hay'adda Dowlad ay kirayso hanti dan guud muddo ka badan 5 sano.

2. Kiraystaha waxaa laga rabaa inuu Dowladda u shubo lacagta kirada bilaawga sanad walba, iyadoo kirada sanadka koowaad lasoo raacinaayo lacag damaanad ah oo u dhiganta kirada hal sano, taas oo loo isticmaali doono dayactirka hantida marka uu dhamaado heshiiska kirada.

3. Kiraystahu waa inuu ku ilaaliya hantida danta guud xaalad wanaagsan, kana dhawr burbur iyo garaafo inta ay gacantiisa kujirto. Si taas loo xaqiijiyo, waa in kiraystuhu ku sameeya hantida dayactir joogta ah. Kiraystuhu waa inuu si degdeg ah kusoo wargeliya hay'adda Dowladda ee heshiiska kula jirta iyo Waaxda Hantida Qaranka, haddii wax burbur ah ama dhaawac ah uu ku yimaad uu ku yimaado hantida.

4. Kiraytuhu waa inuu u hoggansama dhammaan shuruucda iyo xeerarka Dowladda Federalka, iyo mida Dowladda Xubinta ka ah Dowladda ee ku aadan isticmaalka iyo daganaasha hantida danta guud.

Qodobka 22-aad

U-kala wareejinta hanti dan guud ama agab laba hay'add ee Dowladeed

1. Si waafaqsan Qodobka 9(1) ee Xeer-nidaamiyaha, u kala wareejin kasta ee hanti ama agab loo kala wareejiyo laba hay'adood ee Dowladda, waa in loo sameeya habkaan:

   b) waa in ay ku bilaabata codsi ku socda Waaxda Hantida Qaranka iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda;

   t) codsiga hay'adda oo ay la socoto soo jeedinta Waaxda Hantida Qaranka iyo Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Maaliyadda waa in Waaxda Hantida Qaranku u gudbisaa Wasiirka si uu u ansixiyo.

2. Si loo ilaaliyo badqabka hantida danta guud iyo agabka, looguna hoggansamaayo Qodobka 9(3) ee Xeer-nidaamiyaha, Waaxda Hantida Qaranka, ka dib markuu ansixiyo Wasiirka, waxay warbixin buuxda la wadaageysa Hantidhawrka Guud, haddii Waaxda Hantida Qaranka hawlaheeda kormeerka ay kusoo ogaato in hanti ama agabka ku suntan hay'add Dowladeed uu dayacanyahay.Warbixinta markuu helo, Hantidhawrka Guud waxa uu bilaabaya baarista daruuriga ah ee loo bahanyahay, isagoo soo saaraya talooyinka lagama maarmanka ee hantida ama agabka dayaca looga saari karo.

3. Iyadoo loo hoggaansamaayo Qodobka 9(2) ee Xeer-nidaamiyaha, Waaxda Hantida Qaranka ayaa hanti danta guud u kala wareejin karta hay'addo Dowladeed iyada oo cuskanaysa sababaha soo socda:

   b) baahida ay hantida u qabto hay'adda Dawladeed ee hantida loo wareejinayo iyo shaqada ay dadwaynaha ugu qabanayso; iyo

   t) hay'addaha Dawladeed ee hantida loo kala wareejinayo oo la yimaada heshiis wadajirah.

4. Si waafaqsan Qodobka 9(4) ee Xeer-nidaamiyaha, waa in Waaxda Hantida Qaranku ay xogta hanti kala wareejinta la ansixiyay galisaa Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) marka ay hesho warbixinta qiimeynta saxda ee xaalada hantidu ku sugantahay iyo midda kala wareejinta hantida.

5. Iyada oo mar kasta loo hoggaansamaayo Xeerka Qoondada Miisaaniyadda Qaranka, Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud iyo xeer-nidaamiyaashiisa, kharashaad kamiisaaniyadeed ee loo qoondeeyay hantida la wareejiyay waa in lala wareejiyo isla hantida.

6. Macluumaadka kala wareejin kasta ee hanti ama agab oo loo sameeyo si waafaqsan Qodobkaan iyo Qodobka 9-aad ee Xeer-nidaamiyaha waa in lala wadaagaa Hantidhawrka Guud, si uu u cusbooneysiiyo diiwaankiisa.

Qodobka 23-aad

Nidaamka ka saarista (disposal) agab gacanta Dowladda iyo mamnuucista iibinta hantida danta guud

1. Si waafaqsan Qodobka 50(1)(t) ee Sharciga Maareynta Maaliyadda Guud, cidna (shakhsi iyo cid shakhsiyad qaanuun leh) xaq uma laha in ay si gaar ah u yeelato Hantida Danta Guud, waana ka mamnuuc ah in la iibiyo ama si gaar ah loo yeesho.

2. Si waafaqsan Qodobka 10(1) ee Xeer-nidaamiyaha, agabka Dowladda ee lagu qeexay Qodobka 2(1)(t) waxaa laga saari kara gacanta Dowladda keliya haddii:

   b) an loo baahnayn in adeeg loogu sii qabto bulshada ama danta guud;

   t) ay noqdeen hawl-gab (unserviceable); iyo

   j) uu dhamaaday cimrigeedoodi waxtarka lahaa.

3. Si waafaqsan Qodobka 10(2) ee Xeer-nidaamiyaha, agabka Dowladda waxaa looga saari kara gacanta Dowladda:

   b) in la iibiyo, haddii agabka aan loo sii baahnayn isticmaalkiisa; iyo

   t) in la burburiyo, haddii aqabku aanu laheyn wax rajo ah oo lagu iibin karo ama lagu wareejin karo.

4. Hay'addaha Dowladda ee doonaya inay gacantooda ka saaran agab iyaga lagu suntay, waa inay usoo gudbiyaa cosdi faahfaahsan Waaxda Hantida Qaranka si ay dib-u-eegis ugu sameeyso go'aanka ay hay'addu gaartay. Marka ay dhammayso dib-u-eegista, Waaxda Hantia Qaranka, si waafaqsan Qodobbka 10(3) ee Xeer-nidaamiyaha, waa in usoo gudbisaa Wasiirka codsiga hay'adda oo ay lasocoto soo jeedinteeda si'uu u go'aan uga gaaro. Marka la ansixiyo codsiga hay'adda, agabka waa in gacanta Dowladda looga saara si waafaqsan habraaca uu jideeyay Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka.

5. Waa in qiimaha ugu fiican lagu iibiya marka gacanta Dowladda laga saraayo agab iyadoo loo maraayo habka iska iibinta. Sida ku cad Qodobka 10(4) ee Xeer-nidaamiyaha, ka hor inta aan la iibin agab Dowladdeed, waa in dib-u-qiimeeyn lagu sameeya agabka, si loo dejiyo qiimaha ugu yar ee lagu shaacin karo iibintiisa si waafaqsan Sharciga IibkaQ aranka. Hay'adda Dowladeed ee iska iibinaysa aqabka waa in ay qiimaha agabka ee kadhasha natiijada tartanka ama gorgortanka ka diiwangelisa Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) kadib marka ay ogolaanshaha ka hesho Waaxda Hantida Qaranka.

6. Iyadoo loo hoggansamaayo Qodobka 162(2) ee Sharciga Iibka iyo Qandaraasyada Qaranka, markasta oo habka agabka looga saarayo gacanta Dowladda uu yahay in la burburiyo agabkaas, waa in aan la bilaabin hawsha burburinta agabka ilaa laga helo fasax qoraal ah hay'adda Dowladda ee masuulka ka ilaalinta deegaanka iyo hay'adda kasta oo masuul ka ah badqabka guud.

7. Marka la dhammeeyo hawsha ka saarista agabka gacanta Dowladda ee loo maray nidaamka iibinta, hay'adda Dowladdu waa inay heshiiska lagu iibiyay agabka ka diiwaangelisaa Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS), kadibna waa in Waaxda Dakhliga ee Wasaaradda Maaliyadda ay soo saarto qaansheegta dakhli uruurinta kaas oo lagu qaadayo dakhliga kasoo xarooday iibka agabka.

Btm

8. Dhammaan lacagaha ka soo xarooda iibka waa in lagu shubaa Xisaabta Khasnadda Mideysan ee Qaranka iyadoo caddaynta lacag bixintana loo gudbinaayo Xisaabiyaha Guud si uu rasiidka lacag qabashada uga dhex ansixiyo Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS).

9. Aqab kasta oo Dowladded oo laga saaray gacanta Dowladda waa in si waafaqsan Qodobka 11-aad ee Xeer-nidaamiyaha, laga tirtiraa Diiwaanka Hantida Qaranka, walibana laga saara Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) kadib marka ogolaansho laga helo Waaxda Hantida Qaranka iyo Xisaabiyaha Guud.

Qodobka 24-aad

Ka tirtirida agabka laga saaray gacanta Dowladda Diiwaanka Hantida Qaranka

1. Marka agab Dowladdu leedahay laga saaro gacanta Dowladda iyadoo laraacaayo hababka ko qoran Qodobka 23-aad ee Hagahan ama uu agabku lumo, Xisaabiyaha Guud iyo Waaxda Hantida Qaranka waa in ay si wadajir ah uga tirtiraan agabkaas Diiwanka Hantida Qaranka, iyagoo Diiwaanka soo gelinaayan warbixinta caddaynaysa sida agabku uga baxay gacanta Dowladda.

2. Si waafaqsan Qodobka 11(1) ee Xeer-nidaamiyaha, agabka waxaa laga tirtiraya Diiwaanka Hantida Qaranka marka:

   b) agabka Dowladdu uu si buuxda u qiima beelo, la xooro ama uu hawl-gabo, balse jiritaankiisu sii muuqdo;

   t) agabka Dowladda looga saaro gacanta Dowladda si waafaqsan habraaca kuxusan Qodobka 23-aad ee Hagahan; iyo

   j) hay'adda Dowladda ama Waaxda Hantida Qaranku ay xaqiijiyaan, warbixinna ku sheegaan in agabkaas lumay.

3. Ka-tirtirista agabka Diiwanka Hantida Qaranka sabab la xiriirta in agabku lumay, Waaxda Hantida Qaranka oo kaashanaysa Xisaabiyaha Guud, ayaa waxa ay bilaabaysa baaritaan. Haddii baaritaanka lagu soo ogaddo in lumitaanka ku yimid agabka uu sababay fal uu ula kac ah ee uu sameeyay sarkaalka mas'uulka ka ah, waxa warbixinta baarista loo gudbinaya Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Guud si uu dacwad uga furo maxkamadda awoodda uleh.

QAYBTA 6-AAD

KASOO WARBIXINTA HANTIDA DANTA GUUD IYO AGABKA DOWLADDA IYO DHAQAN-GALKA HAGAHA

Qodobka 25-aad

Kasoo warbixinta joogtada ah

BHY

1. Hay'ad Dowladeed ee kasta waa in ay soo saartaa warbixin dhammaystiran oo sanadla ah oo ku saabsan hantida iyo agabka ay maamusho, kuna soo dirtaa Diiwaanka Hantida Qaranka ee ka furan Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS). Marka la helo warbixinnada hay'adda oo dhan, waa in Nidaam-Xisaabeedka Maareynta Macluumaadka Maaliyadda Soomaaliyeed (SFMIS) uu soo saaro Warbixinta Sanadkalaha ah ee Hantida iyo Agabka (Annual Consolidated Report). Warbixintaan waa in ay heli karaan:

   b) Wasiirka, si uu u guto waajibaadkiisa ku aadan maareynta maaliyadda guud;

   t) Waaxda Hantida Qaranka si ay u isticmaalan marka la fulinayo baaritannada iyo kormeerada xaqiijinta badqabka hantida danta guud iyo agabka Dowladda;

   j) Xisaabiyaha Guud si uu ugu adeegsado diyaarinta warbixinta xisaab xirka (balancesheet) Dowladda;

   x) Hanti-dhowrka Guud si uu ugu adeegsado baaritaannada hanti-dhawrista; iyo

   kh) Waaxda Miisaaniyadda, si ay ugu adeegsado diyaarinta soojeedinta miisaaniyadda.

2. Waaxda Hantida Qaranka oo kaashanaysa Xisaabiyaha Guud, ayaa masuul ka ah isku duba ridka Warbixinta Sanadkalaha ah ee Hantida iyo Agabka (Annual Consolidated Report). Wasiirku waa inuu u gudbiyaa warbixintaan Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya, kadib marka Hantidhawrka Guud ugu gudbiyo Baarlamaanka warbixinnada sanadlaha ah ee hantidhawris ee Hantidhawrka.

3. Waa in Waaxda Hantida Qaranka ay ku daabacdo bogga internet-ka ee Wasaaradda, 15 maalmood ka dib marka warbixinta lala wadaago Baarlamaanka, warbixin kooban oo laga soo saaray warbixin sanadeedka dhamaystatiran ee faqradda kore lagu xusay, si dadweynuhu u akhriyaan.

Qodobka 26-aad

Warbixinnada gaarka ah

1. Iyadoo loo hoggaansamaayo Qodobka 12(6) ee Xeer-nidaamiyaha, hay'ad kasta ee Dowladeed waa inay ka samaysee warbixin gaar ah oo saabsan wixii isbeddel, burbur ama khasaare ah ee soo gaara hantida danta guud ama agabka Dowladda oo ay masuulka ka tahay, 30 maalmood gudahooda kadib marka uu dhaco falka saameeyay hantida ama agabka.

2. Si waafaqsan Qodobka 12(7) ee Xeer-nidaamiyaha, Waaxda Hantida Qaranku waa in ay ogaysiisaa:

   b) Xisaabiyaha Guud haddii ay jirto wax shuruud ah oo looga baahan in lala kulmomarka laga tirtiraayo agab laga saaray gacanta Dowladda Diiwaanka Hantida Qaranka;

   t) Wasiirka haddii ay jirto codsi ku saabsan wareejin hanti dan guud ama khaarajinagabDowladeed;

j) Hantidhawrka Guud haddii ay jirto baahi loo qabo baaris hantidhawris oo kusaabsanhanti dan guud ama agab Dowladdeed; iyo

x) Xeer Ilaaliyaha Guud, haddii ay jirto dembi laga galay ama ka dhan ah hanti danguudama agab Dowladdeed.

3. Si waafaqsan Qodobka 12(8) ee Xeer-nidaamiyaha, Waaxda Hantida Qaranku waxa ay wakhti kasta codsan kartaa in ay xaqiijiso xaalada uu ku suganyahay hanti dan guud ama agab Dowladdeed ama kormeerto hanti dan guud ama agab Dowladeed. Waaxdu waxay sidoo kale u sameeyn kartaa hawlaha xaqiijinta iyo kormeerkasi lama filaan ah.

Qodobka 27-aad

Xisaabinta hantida danta guud iyo agabka

1. Si waafaqsan Lifaaqa 3-aad ee Hagahan, Xisaabiyaha Guud waa inuu go'aamiya jaantusyada xisaabaadka (codes on the charts of a ccounts) iyo heerarka xisaabinta (accounting standards) ee laga rabo hay'adaha Dowladda inay u hoggaansaman marka ay go'aaminayan qiimaha, qiima dhaca iyo qiima beelka (impairment) hantida danta guud iyo agabka Dowladda.

2. Hantida danta guud iyo agabka Dowladda waa in lagu kala sooca nuucyada ay kala yihiin iyo muddada lifilaayo inay waxtar dhaqaale leeyihiin. Marka kowaad ee lakala soocaayo, hantida ama agabka waa in lagu sameeyay qiimayn laga tixraacyo midda lagu soo iibshay, haddi aan taa laheli karina, waa in qiimayn lagu sameeya iyadoo la racaayo habka ku qoran Lifaaqa 3-aad ee Hagahan. Dib-u-qiimayta hantida danta guud iyo agabka waa in lasameeya sida ku qeexan isla Lifaaqa 3-aad ee Hagahan, ama xilli kasta ee Xisaabiyaha Guud u arko daruuri.

Qodobka 28-aad

Dhaqan-Galka Hagahan

1. Hagahan waxa uu dhaqan gelayaa marka uu saxiixo Wasiirka Maaliyadda, waxaana lagu daabacaya bogga internet-ka ee Wasaaradda Maaliyadda.

2. Wasiirku wuxuu amar ku bixin karaa, haddii ay lagama maarmaan noqoto, in dib loo dhigo ama la hakiyo dhaqangelinta qodobo ka mida Hagahan, si loo hubiyo in Hagahan u dhaqan-galo si wax ku ool ah.

Xildhibaan Biixi Imaan Cige **Sebtember 11, 2023**

Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA OFFICE OF THE MINISTER XAFIISKA WASIIRKA MINISTRY OF FINANCE WASAARADA MAALIYADDA

LIFAAQA 1

KALA SOOCIDDA HANTIDA IYO AGABKA

Nuucyada hantida iyo agabka	Heerka IPSAS	Qeexitaan
Dhul	IPSAS 17	Dhulka iyo goobaha biyo galeenka ama biyo mareenka ah sida haraha, baliyada, wabiyada iyo biyo galeennada ama biyo mareennada badaha aan udhawayn, balse aan ku jirin seerooyinka qaranka iyo seerooyinka ugaarta.
Horumarinada dhulka lagu sameeyay	IPSAS 17	Horumarinada dhulka lagu sameeyo oo keena in baaxda dhulka, tayadiisa ama wax soo saarkiisu kordho ama kuwa kahortaga xaalufka dhulka. Horumarinadan waxaa kamida ka dhisida dhul biyaha dushooda (land reclamation), banaynta dhul (land clearance), qaabayn dhulka (land contouring) iyo dhismayasha sida ceelasha iyo barkadaha oo ah qayb dhulka ka mid ah, balse aan ku jirin seerooyinka qaranka iyo seerooyinka ugaarta.
Dhismayaasha gurayaha ah	IPSAS 17	Dhismayaasha guriyaasha ah ee deegaanka loo isticmaalo, ha ahaado kuwa madani iyo kuwa ciidan, oo ay kujiraan dhismayaasha qaybta ka ah sida garaashyada, iyo dhammaan qalabyada ku rakiban guryaha.
Dhismayaasha kale	IPSAS 17	Dhismayaasha xafiisyada, bakhaarada, kuwa ganacsiga iyo warshadaha, beeraha macmilka ah iyo meelaha dhirta lagu xanaaneeyo, garoomada ciyaaraha, guryaha guur-guura, goobaha raaxada ee dhisan, goobaha kaydinta shidaalka, kawaannada xoolaha, goobaha wax-qaboojiya, goobaha caanaha lagu warshadeeyo, xabsiyada, isbitaalada iyo dugsiyada.
Hantida loo maalgeliyay si wax looga faa'ido	IPSAS 16	Hantida loogu talagalay in ay soo saarto dakhli.

Nuucyada hantida iyo agabka	Heerka IPSAS	Qeexitaan
Kaabayaasha dhaqaale	IPSAS 17	Waddooyinka waawoyin, nalalka waddooyinka, waddooyinka tareenada, biyo-xireennada, bulaacadaha, kaabayaasha korontada, kaabayaasha garoomada diyaaradaha, goobaha dalagyada beeraha lagu kaydiyo, goobaha waraabka; kaabayaasha biyaha; ceelasha riigga ah ee shidaalka ee badaha, tubbooyinka, iyo xerooyinka xoolaha.
Gaadiidka iyo qalabkiisa	IPSAS 17	Gaaadiidka oo ay ku jiraan cagaf-cagafyada, tareenada, basaska, doomaha, gawaarida khaaska ah, kuwa xamuulka qaada laakiin aan ku jirin gawaarida milatariga oo hubku ku rakibanyahay; iyo diyaaradaha, oo aan kujiran diyaaraha iyo kuwa qumaatiga u duula ee militariga.
Kumbuyuutarka iyo qalabka isgaarsiinta	IPSAS 17	Qalabka kombiyuutarka iyo nidaamyada ay ku shaqeeyaan (softwares), shabakadaha isgaarsiinta iyo qalabka isgaarsiinta.
Warshadaha nuucyadooda kale iyo mishiinada	IPSAS 17	Warshadaha sida meelaha shaybaarka, konteenarada guurguura, qalabka xaaladaha degdega ah, wiishashka, qalabka saadaasha hawada, qalabka caafimaadka, xerooyin birta kasameysan ee xayawaanka, qalabka beeraha, qalabka juquraafi, mishiinada, qaboojiyasha, kuleyliyasha, mishiinada wax burburiya iyo kuwa malaasa (graders & rollers).
Alaabta iyo qalabyada xafiisyada	IPSAS 17	Alaabta iyo qalabyada xafiisyada.
Hubka	IPSAS 17	Gaadiid dagaalka iyo qalab kale oo qayb ka ah hababka hubka, oo ay ka mid yihiin diyaaradaha dagaalka, taangiyada, gaadiidka gantaalada xambaara, kuwa riddada iwm.
Qalabka kale ee milatariga	IPSAS 17	Mashiinno iyo qalab loogu talagalay ujeeddooyin ciidan oo aan ahayn hubabka.
Hantida leh qiimaha dhaqanka iyo hidaha	IPSAS 17	Dhismayaasha leh qiimo hido iyo dhaqan, iyo farshaxanka.

Nuucyada hantida iyo agabka	**Heerka IPSAS**	**Qeexitaan**
Xoolaha la dhaqdo	IPSAS 27	Kaydka taranka xoolaha, lo'da caanaha,, idaha, ama xoolaha kale ee loo isticmaalo soosaarka dhogorta, xoolaha loo isticmaalo gaadiid ahaanta, tartanka, ama madadaalada, iyo kheyraadka biyaha.
Dhirta la beero	IPSAS 27	Dhirta la beerto oo ay ku jiraan geedaha canabka oo loo beero si looga helo miro, lawys, beeyo, xabag, caleenta iyo jilif.
Seerooyinka qaranka iyo kuwa ugaarta	IPSAS 17	Dhulka iyo horumarinta lagu sameeyay, ugaarta iyo xayawaanka ku jira seerooyink.

Btty

LIFAAQA 2

CIMRIGA DHAQAALE OO AY WAXTARKA LEEYIHIIN

Nuucyada hantida iyo agabka	**Cimriga dhaqaale oo ay waxtarka leeyihiin**
Dhul	Ma cayiminno
Horumarinada dhulka lagu sameeyay	10-50
Dhismayaasha gurayaha ah	50-60
Dhismayaasha kale	50-60
Hantida loo maalgeliyay si wax looga faa'ido	10-50
Kaabayaasha dhaqaale	10-50
Gaadiidka iyo qalabkiisa	5-30
Kumbuyuutarka iyo qalabka isgaarsiinta	5-15
Warshadaha nuucyadooda kale iyo mishiinada	10-15
Alaabta iyo qalabyada xafiisyada	5-10
Hubka	5-55
Qalabka kale ee milatariga	5-55
Hantida leh qiimaha dhaqanka iyo hidaha	2-ilaa muddo aan cayiminayn
Xoolaha la dhaqdo	5-20
Dhirta la beero	5-20
Seerooyinka qaranka iyo kuwa ugaarta	Ma cayiminno

LIFAAQA 3

HABKA QIIMAYNTA KOWAAD IYO MIDDA JOOGTADA AH

Nuucyada hantida iyo agabka	**Heerka IPSAS**	**Habka qiimaynta**	**Xiliyada dib-u-qiimaynta lagu samaynaayo**
Dhul	IPSAS 17	Qiimaha suuqa ay ka joogaan.	Shan sano
Horumarinada dhulka lagu sameeyay	IPSAS 17	Qiimaha suuqa ay ka joogaan.	Shan sano
Dhismayaasha gurayaha ah	IPSAS 17	Qiimaha suuqa ay ka joogaan.	Shan sano
Dhismayaasha kale	IPSAS 17	Qiimaha suuqa ay ka joogaan.	Shan sano
Hantida loo maalgeliyay si wax looga faa'ido	IPSAS 16	Qiimaha suuqa ayka joogan, marka laga reebo dhismayaasha khaas ah (xabsiyada, isbitaalada, iskuulada, iyo qaybo ka mid ah safaaradaha), kuwaas oo lagu qiimayn doono iyadoo la isticmaalayo habka qiimaha lagu bedelaayo hantida oo lagu daraayo qiima dhaca ku yimid hantidaas (Depreciated Replacement Cost).	Shan sano
Kaabayaasha dhaqaale	IPSAS 17	Qiimaha lagu bedelaayo hantida oo lagu daraayo qiima dhaca ku yimid hantidaas (Depreciated Replacement Cost).	Shan sano
Gaadiidka iyo qalabkiisa	IPSAS 17	Marka laga reebo gaadiid gaarka ah, qiimaha lagu bedelaayo hantida oo lagu daraayo qiima dhaca ku yimid hantidaas (Depreciated	Sadax sano

BHY

Nuucyada hantida iyo agabka	Heerka IPSAS	Habka qiimaynta	Xiliyada dib-u-qiimaynta lagu samaynaayo
		Replacement Cost).	
Kumbuyuutarka iyo qalabka isgaarsiinta	IPSAS 17	Qiimaha suuqa ay ka joogaan.	Sadax sano
Warshadaha nuucyadooda kale iyo mishiinada	IPSAS 17	Qiimaha suuqa ay ka joogaan.	Sadax sano
Alaabta iyo qalabyada xafiisyada	IPSAS 17	Qiimaha suuqa ay ka joogaan.	Shan sano
Hubka	IPSAS 17	Qiimaha lagu bedelaayo hantida oo lagu daraayo qiima dhaca ku yimid hantidaas (Depreciated Replacement Cost).	Shan sano
Qalabka kale ee milatariga	IPSAS 17	Qiimaha lagu bedelaayo hantida oo lagu daraayo qiima dhaca ku yimid hantidaas (Depreciated Replacement Cost), haddii uusan jirin qayb suuqa kamida oo si gaar ah u danaynaysa qalabka, iyadoo markaas la isticmaalaayo qiimaha suuqa.	Sadax Sano
Hantida leh qiimaha dhaqanka iyo hidaha	IPSAS 17	Qiimaha taariikhiga ah ama qiimaha suuqa ay ka joogto, haddii ay macquul tahay in la oggaado.	Sanadkasta hantida leh qiime suuq ee la yaqan.
Xoolaha la dhaqdo	IPSAS 27	Qiimaha suuqa oo laga jaray kharashka ku baxaay in la iibiyo (Market value fewer costs to sell).	Sanadkasta
Dhirta la beero	IPSAS 27	Qiimaha suuqa oo laga jaray kharashka ku	Sanadkasta

BHM

Nuucyada hantida iyo agabka	**Heerka IPSAS**	**Habka qiimaynta**	**Xiliyada dib-u-qiimaynta lagu samaynaayo**
		baxaay in la iibiyo (Market value fewer costs to sell).	
Seerooyinka qaranka iyo kuwa ugaarta	IPSAS 17	Qiimaha suuqa ay ka joogaan.	Shan sano
Agabka in la iibiyo sugaaya	IPSAS laguma dabaqaayo. Eeg IFGS 5.	Qiimaha suuqa ay ka joogaan.	Lama dabaqaayo

Tusmo

Qodobka 1-aad:..1
Qodobka 2-aad:..1-2
Qodobka 3-aad:..2-3
Qodobka 4-aad...4-5
Qodobka 5-aad...5
Qodobka 6-aad...6
Qodobka 7-aad...6-7
Qodobka 8-aad...7-8
Qodobka 9-aad...9
Qodobka 10-aad...9
Qodobka 11-aad...10
Qodobka 12-aad...10-11
Qodobka 13-aad...11
Qodobka 14-aad...11-12
Qodobka 15-aad...13
Qodobka 16-aad...13-14
Qodobka 17-aad...14
Qodobka 18aad...14-16
Qodobka 19-aad...16-17
Qodobka 20-aad...17-19
Qodobka 21-aad...19
Qodobka 22-aad...19-20
Qodobka 23-aad...20-22
Qodobka 24-aad...22
Qodobka 25-aad...22-23
Qodobka 26-aad...23-24
Qodobka 27-aad...24
Qodobka 28-aad...24
Lifaaqa 1-aad..25-27
Lifaaqa 2-aad..28
Lifaaqa 3-aad..29-31